

DHULGARIIRRADA

Dhulgariir waa sibqashada ama dhaqdhaqaaqa qayb dhulka udubyadiisa ama dhigihisa ka mid uhu ay degdeg u dhaqaaqaan iyadoo ay siiddeyn cadaadinu ay dhaqaaqaa sababayso. Bu'da ama xuddunta dhulgariirrada waxay inta badan oogada Dhulka ka hooseeyaan ugu yaraan 25 mayl waxaana la socda ama wax yar ka damvbeeya gariiro isxig-xiga.

Sababta ay dhulgariirrada khatarta badan u leeyihiin waxa weeye in ruxashada dhulku ay sababi karto:

- In ay dhismayaashu ka dhaqaaqaan aasaaskooda ama ay dumaan.
- Dhib gaara yutiilitida (gaaska, biyaha, iwm,) dhismeyaasha iyo waddooyinka.
- Dab iyo qaraxyo oo uu sababo.
- In uu sababo degganaan la'aan dhismeyaasha ku timaadda sida biyo-xireennada oo faruurma oo markaa sababa daadad xawli ku socda.

Dhulgariirradu waxay sidoo kale sababi karaan in ay dhul-siq iyo daadad jil iyo xaab qaad ah iyo sunaamiyo. Dhulgariir dabadii, waxaa muhiim ah in la dhegaysto tilmaamaha xaaladda degdegga ah ee la bixinayo.

Iyadoo wada jira, dhamaan noocyadaa dhibka ah oo idil waxay khatar geliyaan nafta dad badan, hantidooda iyo weliba bay'addaba.

Meelaha ay sida weyn ugu badan tahay in uu dhulgariir baaxad lihi ka dhaco waxay ku yaalliin:

- Galbeedka Maraykanka, gaar ahaan Babaca *San Andreas* ee ku yaal California ilamaa iyo xeebaha Alaska.
- Aagga New Madrid Fault ee dhaca Missouri.
- Meelo dhawr oo goggo'an oo ku yaal xeebaha bari (ee Maraykanka.)

Celcelis xisaabeedyo ku saabsan dhulgariirrada ayaa waxaa ka mid ah:

- Shan iyo toban boqolkiiba oo ka mid ah dadka ayaa ku nool meelaha ay ka dhici karaan masiibooyin waaweyn.
- 17 ka milyan ee California ayaa wajahaya halista ugu sarraysa, waxaana ku xiga dadka deggan Gobolka Washington.
- Afar milyan oo dad ah ayaa waxay deggan yihiin meel uu ka burburin karo Babaca New Madrid Fault.
- Dadka deggan Massachusetts, North Carolina, iyo South Carolina-na halis bay ku jiraan.

DHULGARIIRRADA (WELI SOCDA)

Boqollaal gilgilasho ayaa sanad kasta la dareemaa, gaar ahaan California gudaheeda. Dhulgariirrada waaweynse waa dhif. Shan dhulgariir oo waaweyn ayaa qarnigii ina dhaafay ka dhacay Maraykanka. Waxaa ay ka dhaceen:

- San Francisco, 1906 (2,000 qof ayaa ku dhimatay).
- Alaska, 1964 (131 qof ayaa ku dhimatay).
- San Fernando, California, 1971 (65 qof ayaa ku dhimatay).
- Loma Prieta (Northern California), 1989 (66 qof ayaa ku dhimatay).
- Northridge (Southern California), 1994 (61 qof ayaa ku dhimatay).

Ma jirto wareeg-sanadeed ama xilliyeed uu dhaco dhulgariirku; dhulgariirradu waxay dhici karaan mar kasta. Dhulgariirrada waaweyn waxay u muuqdaan in ay dhacaan wareeg-xilliyeed 50 iyo 275 sano ah. Waxay u badan tahay in dhulgariir baaxad weyni uu ku dhufan doono California iyo meelo kale oo Maraykanka ah tobanka ama labaatanka sano ee soo socota.

Dhulgariir wuxuu ku ekaan karaa ilbidhiqsiyo ama daqiiqado, iyadoo ay gariir-dambeedkuna socon karaan muddo bilo ah dhulgariirka weyn ka dib.

Dhulgariirrada waxaa lagu kala soocaa iyadoo lagu salaynayo qiyaasta Miisaanka Richter, waana sidan:

- Yar: 5.0-5.9.
- Dhexdhexaad ah: 6.0-6.9.
- Weyn: 7.0-7.9.
- Aad u baaxad weyn: 8.0 or greater.

Miisaanka Richter waxaa uu leeyahay sal logardam ah, si ku darsan kasta oo miisaanka ah loogu dhufto saameeye 10 ah. Tusaale ahaan, dhulgariirka uu xajmigiisu yahay 8.6 uma uu khaskhashaad badna laballaabka midka ah 4.3, balse 10,000 oo jeer buu ka sii ba'an yahay.

DHULGARIIRRADA (WELI SOCDA)

KA BEDBAADIDDA DHULGARIIRRADA

Waxaa lagu taliyaa in aad:

- Samayso qorshe dhulgariir oo gurigu leeyahay si aad u ogaato waxaad sameyn lahayd inta uu socdo dhulgariir ama ka gadaal dhulgariir.
- La samee tababbar dhulgariir qoyskaaga iyo dadka kula shaqeeya. Sii xulo meelo nabdoon (Tus., miis kakan hoostiis), ogowna aagagga khatarta (Tus., daaqadaha agtooda).
- Samee qorshe aad isugu keento dhamaan xubnaha qoyska ka dib dhicidda dhulgariir.
- Sii aqoonso qof gobolka ka baxsan oo qoysku ay telefoon u diraan.
- Gacanta ku hay sahayda, oo ay ku jiraan cunto iyo biyo 3 beri ku filan, toosh leh beteri dheeraad ah, raadiye, dab bakhtiye, iyo qalab.
- Ku xaree alaabta jabaysa ee culus daaqado hoose. Caws-dileyaasha, sunta cayayaanka, iyo walxaha ololi kara waa in lagu xareeyaa daaqadda ugu hoosaysa ama sanaadiiq la xiri karo oo faseexad leh. Kiimikooyinka uma badna in ay halis kiinaan haddii meelo hoose oo xayiran.
- Ku adkee shelefyada buugta, kululeeyayaasha biyaha, iyo faraajiinta dhaadheer qabatada gidaarka. Dhamaan armaajooyinka ku xir faseexado lagu furo kuna xir meel aysan ka soo dhici karayn. Xaji oo xidh alaabta soo dhici karta sida telefishannada.
- Xirfadle shati leh ha kuu xiro tuubbada jiljilan si looga fogaado liig gaas ama mid biyo.
- Sariiraha ka fogee daaqadaha.
- Durji ama xir alaabta ka soo laallaadda sariiraha korkooda, kuraasta, ama meelaha kale ee ay dadku fariistaan ama seexdaan.
- Kabaha iyo tooshashkaba ku hay sariirta hoosteeda. Ku haysiga kabaha sariirta hoosteeda waxay xaqiijisaa in aad markiba hesho oo aanay muraayad daadatay lugaha kaa mudin iyo in ay muraayada daadatay ku dhex dhicin kabaha laftooda.

Waxaad kiraysan kartaa injiyeer dhismeyaasha ku talax-tegay si uu u qiimeeyo hoygaaga. Su'aalo ku saabsan dayac-tirka iyo adkeynta qaabaalka sare sida balakoonnada gandoobka, albaabbada siqa, kaanabiga, meesha gaadiidka, iyo albaabka garaashka weydii.

DHULGARIIRRADA (WELI SOCDA)

Si aad u nabdoonaato inta uu dhulgariirku socdo, waa inaad:

- Dhacdaa, is-deddaa, oo xagsataa. Intii muhiim u ah in aad meel nabdoon gaarto uun dhaqaaq. Dadka u badan ee ku dhaawacma dhulgariir waa kuwa dhaqaaqay in ka badan shan cagood inta ay ruxashadu socoto.
- Haddaad gol ku jirtid, meeshaada joog. Dhimashooyin badan ayaa dhaca markay dadku bannaanka u ordaan, oo uu markaa dilaa burburka ka soo daadanaya derbiyada dumaya. Waxaa nabdoon in gudaha lagu jiro inta ay ruxashadu ka istaagayso oo ay nabdoonaan ka noqonayso in la baxo. Markaad bannaanka u baxaysid, degdeg uga dhaqaaq dhismaha oo tag meel ka fog si aad isaga dhawrto dhaawac uu kuu geysto burburka soo daadanaya.
- Haddii aad bannaanka jirto, meel ka fog dhismayaasha, geedaha, baallooyinka korantada iyo buundooyinka qallalan hel. Dhulka isku rid oo halkaa jog inta ay ruxashadu ka istaageyso. Dhaawacyadu waxay ka iman karaan geedaha dumaya, nalalka jidadka iyo fiilooyinka korantada, iyo qashinka dhismayaasha.
- Haddaad gaari ku jirto u durji meel bannaan oo jooji. Suunka oo kuu dhuuqsan gaariga dhex-joog inta ay ka istaageyso ruxashadu.

Bixi baaqyadaan oo ku salaysan meesha aad ku nooshahay:

- Haddii aad dhisme sare u dhisan ku jirtid, filo in biye-firdhiyeyaasha iyo colcolaadda dabkuba ay kacayaan inta lagu jiro dhulgariir. Eeg oo demi dababka yaryar. Ha isticmaalin wiishashka lagu fuulo dabaqyada.
- Haddii aad joogtid aag xeebeed, meel sare u dhaqaaq. Inta badan dhulgariirradu waxay abuuraan sunaami.
- Haddaad joogtid dhul buuraley ah ama meel u dhaw haadaan lulata ama qarar, ka digtoonow dhagaxyada soo dhacaya ama burburka uu dhulgariirku sii nigleyn karo. Sidoo kale, iska ogow daadadka uu dhulgariirku fatihi karo.

DHULGARIIRRADA (WELI SOCDA)

Markaad adigu is bedbaadiso, waa in aad:

- Raadi oo demi dababka yaryar. Dabku waa khatarta ugu caamsan ee dhacda dhulgariir dabadii. Bakhtiinta dababka yaryar iyo baabbi'inta halista dabeed waxay yaraynaysaa khatarta ka imanaysa dab gacanta ka baxa.
- Nadiifi waxyaabaha daatay. Nadiifinta dawada, warakiilka, waxyaabaha ololi kara iyo tifiqyada kale, waxay suuraggal ka dhigaysaa in khataro badan oo aaladda halista ah ku tacalluqa oo yaryar laakiin aad u halis ah laga bedbaado.
- Guriga ka eeg wax burbursanaan ah. Ruxashada dambe waxay guryaha aan degganayn ku keentaa dhaawacyo hor leh. Haddii ay shooladda guriga ama aasaaska guriga ay wax gaareen ama yutiilitida uu dhaqaajiyey dhulgariirku, qof kasta ka saar guriga. Sawirro ka qaad guriga iyo wixii ku jira si aad dikumiinti ahaan ugu gudbiso sheegashadaada caymiska.
- Caawi deriska u baahan kara kaalmaynta.
- Saar idaacadda Habka Wargelinta Xaaladda Degdegga ah (EAS) si aad uga heshid xog ku saabsan musiibada iyo tilmaamoba.
- U toog-hay ruxashada dambe. Ruxashada dambe (aftershock) waxay inta badan dhacdaa daqiiqado, maalm o ama toddobaadyo ka dambe dhulgariirka. Marka ay ruxashada dambe dhacdo dhac, is-ded, oo xagso.

Beenta iyo Runta ku saabsan Dhulgariirrada

<p>Been:</p> <p>Run:</p>	<p>Isticmaal ganjeelle (doorway) si aad isu ilaaliso marka uu socdo dhulgariirku.</p> <p>Iyadoo ay ganjeelladu xafidid kugu filayn samayn karaan xilliga dhiulgariirrada yaryar, maaha in loo isticmaalo wadiiqooyinka xafidaad, waayo:</p> <ul style="list-style-type: none"> ▪ Dhamaan ganjeellayaashu kuma dhisna dhismaha oogada ee dhismahaa. ▪ Ganjeelleyaal badan baa u dhisan si ka weyn sida ay carruurta iyo qaangaarka gaaggaabanba si saxan ugu isticmaali karaan is-xafidid. ▪ Xitaa haddii ay qayb ka yihiin dhismaha oogada ee guriga, hal qof uun bay xafidi karayaan. ▪ Dhulgariirrada leh dhul-dhaqaaq dhexdhexaad ilaa mid daran ahi waxay qofka ganjeelka isticmaalaya ku sababi karaan in ay bannaanka u haadaan ama ay dhaawacmaan iyagoo ganjeelka xaggiisa u sii socda.
<p>Been:</p> <p>Run:</p>	<p>Xayawaanku waxay dareemi karaan dhulgariirka waxaanay sii bixin karaan digniino horudhac ah.</p> <p>Xayawaannadu waxay awoodaan in ay dareemaan hirarka mawjadaha hoose ee dhulgariir ka dhaca dhulka hoostiisa, laakiin hirarka dhibta geysta ee koowaad iyo kuwa heerka labaadba waxay kaa ka dambeeyaan ilbidhiqsiyo. Xayawaannadu markaa maaha kuwo loo isticmaali karo in ay noqdaan qalab ka diga dhulgariirrada.</p>
<p>Been:</p> <p>Run:</p>	<p>Dhulgariirrada waaweyn subixii hore ayay dhacaan.</p> <p>In kasta oo dhawr dhulgariir oo dhaweyd ay dhaceen subixii hore, haddana kuwo kale, oo uu ku jiro kii 1990 ee Dhulgariirkii Upland loo baxshey iyo kii 1989 Dhulgariirkii Loma Prieta, waxay dheceen galabnimo. Waa sahal in markaa la xusuusto dhulgariiradii subixii ahaa, kuwii aan shardigaa buuxinna layska halmaamo.</p>
<p>Been:</p> <p>Run:</p>	<p>Hantida Beachfront ee ku taal Arizona . . .</p> <p>Dhaqaaqa udubyada waa mid dadban, maahan mid taagan. California ku dhici mayso badda, xitaa markii uu dhaco dhulgariir aad u baaxad weyn ka dib.</p>
<p>Been:</p> <p>Run:</p>	<p>Lambarrada afgaradka fiican guryaha lehi waa guryo nabdoon.</p> <p>Musiibadii Kobe, ee Japan, waa xusuusin wanaagsan oo muujinaysa afgaradyada ugu fiican dhisme ee la sameeyo in aanay wax tarayn guryihii la dhisay codes-ka intaan la hawlgelinin ka hor. Sixidda dhibaataada guryaha duqa ah waa masuuliyad saran mulkiilaha dhismaha.</p>

Beenta iyo Runta ku saabsan Dhulgariirrada

Been:	Culimada saynisku way saadaalin karaa dhulgariirrada.
Run:	Ma jiro saynisyahan ama jaamacad ku guulaysatay in la saadaaliyo waqtiga dhulgariir maalmo gudahood ah, mana ay rajaynayaan in ay awoodi doonaan mustaqbalka dhaw.

[THIS PAGE WAS LEFT INTENTIONALLY BLANK.]